



Macluumaadka ku saabsan baaritaanka caafimaadka ee xilliga diiwaangelinta dugsiga

Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta qaaliga ah,

Iimahaagu mar dhow wuxuu aadi doonaa dugsi. Dhammaan carruurta ku nool Münch kuwaas oo **jira da'da afar iyo shan sano**, waxay ka qaybqaadanayaan baaritaanka caafimaadka ee diiwaangelinta dugsiga. Tusaale ahaan, aragga, maqalka iyo horumarka luqadda ee ilmahaaga ayaa la baari doonaa. Inta lagu jiro baaritaanka, shaqaalaha caafimaadku waxay go'aamin karaan sida iyo meelaha laga caawin karo ilmaha sida ugu wanaagsan ee suurtogalka ah laga bilaabo **sannadka ugu dambeeyaa ee dugsiga xannaanada carruurta** iyo wixii ka dambeeyaa si ilmaha uu bilawga wanaagsan ugu bilaabo nolol maalmeedka dugsiga.

Baaritaanka waa **qasab** marka la joogo Bavaria. Waad heli doontaa martiqaad/casuumaad kaaga imaanaysa Waaxda Caafimaadka. Waaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka caafimaadka ka heli kartaa: muenchen.de/rseu



Haddi aadan ilmahaaga **ka soo xaadirinin** baaritaanka caafimaadka iska diiwaangalinta dugsiga kadib markii Aad Martiqaad/Casuumaad ka heshay Waaxda Caafimaadka, xogtaada waxaa la siin doonaa Xafiiska Daryeelka Dhalinyarada ee Magaalada München.

Xafiiska Daryeelka Dhalinyarada ayaa kula soo xiriiri doona si uu u ogaado sababta uu baaritaanka u dhici waayay.

Xarunta bulshada ee xaafadda waxay bixisa caawimaad iyo taageero la idiinku talagalay adiga iyo ilmahaaga. Si Aad u ogaato xarunta bulshada ee ku taala xaafaddaada, waxaad isticmaali kartaa linkigan:

stadt.muenchen.de/service/info/sozialbuergerhaus/1060763/



Xafiiska daryeelka dhalinyarada ee magaaladaada

Esther Maffei
Xafiiska Daryeelka
Dhalinyarada
Magaalada

Wir sind München
für ein soziales Miteinander